FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

*Sanadka 7-aad Garowe 15 September 2005* *lam 9*

جريدة الشهرية

*Faafinta bilwalba soo baxda*

***Qaybta faafinta rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

*Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 Lambar walba.* ***Rukunka Sanadkii*** *waa Sh/So. 170,000 dalka gudihiisa, dibadda Sh/So. 500,000* ***Rukunka*** *la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yay waa Sh/So. 3,000* ***Rukunka*** *iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.*

# TUSMADA

**Qaybta Kowaad**

**Sharci**

**Qaybta Labaad**

**Xeer**

**Waxba Ma Leh**

**Qaybta Sadexaad**

***Talooyin, isgaarsiin, ogaysiis, iidheh, IWM***

***Waxba ma leh***

Sharci Lr.1 . ee 08/09/2005, kuna saabsan sharciga Shaqada iyo shaqaalaha Puntland iyo lifaaqiisa.

**Bogga 2 - 33**

**DAWLAD G. PUNTLAND EE SOOMAALIYA**
**Xafiiska K/simaha Madaxweynaha**

**PUNTLAND STA**
**OF SOMALIA**
**Office of the Vice Pr**

Sharci Lr. 1. ee 8/09/2005, kuna saabsan sharciga shaqada iyo shaqaalaha.

**K/simaha Madaxweynaha**

MARKUU ARKAY Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaa

MARKUU GARAWSADAY Muhiimadda sharcigani u leeyahay Shaqada iyo Shaqaalaha Puntland

MARKUU ARKAY Ansixinta Golaha wakiillada Puntland ee Lr. XGGW /DGPL/ 128/2005, ee 16/07/2005.

MARKUU DHEGAYSTAY Rayiga Golaha Xukuumada.

**WUXUU SOO SAARAY**

**Sharciga soo socda :-**

**Qodobka Kowaad**

Waxaa Golaha wakiillada Puntland ansixiyeen sharciga Shaqada iyo shaqaalaha Puntland.

**Qodobka Labaad**

Nuqulada asalka ah waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Gollaha Wakiillada.

**Qodobka Saddexaad**

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka K/simaha Madaxweynuhu saxiixo, lagu saaro faafinta Rasmiga ah ee Puntland, markaa ayaa sharcigani kamid noq shuruucda Dawladda Puntland qof kastana ay waajib ku noqonaysaa inuu dhawr dhaqmo.

*Xasan Daahir Maxamuud*
*Madaxweyne-kuxigeenka*
*ahna Sii-hayaha xilka Madaxweynaha*

# HORDHACA

Buugan oo ku saabsan shuruucda shaqada iyo shaqaalaha , waxaa ku idil sharciga ah No5. Ee soo baxay (2/2/1980) kuna saabsan shaqada iyo shaqaalaha .

Islamar ahaantaas wuxuu ka kooban yahay sharcigani 12qaybood oo waafaqsan axdiga D.G.PL ee dhaqan galay 1/8/1998.

Ku talagalkiisuna waa barashada shaqada iyo ku dhaqan gelinta goobaha shaqada .

Wuxuuna ku qoran yahay afka soomaaliga si qofkasta loogu sahlo fahamkiisa .

Sidaa darteed waxaan rajenaynaa shaqaalaha D.GPL ee soomaaliya in ay uga faa'iidaystaan buugaan si mug leh.
Lege N.5del 2.21998

# TUSMO KOOBAN OO KU SAABSAN SHURUUCDA SHAQAALA


| | | |
|---|---|---|
| | | Bogga 1 |
| Qaybta 1aad; | Qodobo guud. | |
| Qaybta 2aad; | Qaabka | = = = 2 |
| Qaybta 3aad; | Shaqosiinta . | 2 |
| Qaybta 4aad; | Tijaabada iyo rasmiyeynta shaqoqorista | 5 |
| Qaybta 5aad; | Waajibaadka | 6 |
| Qaybta 6aad; | Fasaxa | 8 |
| Qaybta 7aad; | Dalacaad darajo,dhimid, eryid, bedelaad | 9 |
| Qaybta 8aad; | Anshaxa | 11 |
| Qaybta 9aad; | Dhamaadka xiriirka shaqada | 14 |
| Qaybta 10aad; | Qaybta farsamo yaqaanka | 16 |
| Qaybta 11aad; | Badbaadada shaqaalaha iyo gunnooyinka | 19 |
| Qaybta 12aad; | Hawlgabka dheelitirka . | 20 |
| Lifaaqa | | 24 |

Lege N.5del 2.21998

## QAYBTA 1AAD

# QODOBO GUUD

## 1.Cadayn.

Ereyada soo socda, haddaan sharciga gudihiisa si kale loogu fasirin , waxaa
ola jeedaa sida eray kasta ku dhinac qoran :
Golaha wasiirada wuxuu ka kooban yahay ;
Madaxweynaha dawlad goboleedka puntland iyo golaha wasiirada oo dhan .
'HEER" waxaa loola jeedaa darajooyin is leh oo is raacsan sida lagu
maamay qod.40aad ee sharcigan.

'Qoys" wuxuu ka kooban yahay qofka shaqaalaha ah iyo afadiisa/ninkeeda
o carruurtiisa carruurteeda aan qaan-gaadhka ahayn.
'Darajo" waxaa loola jeedaa qaybaha heerarka loo kala saarayo.
Madaxa hay'adda waxaa loola jeedaa.
)Madaxweynaha dawlad goboleedka puntland marka laga hadlayo madax-
oyada D.G.PL.
)wasiirka wasaaradda qaabilsan.
)Sarkaalka u madaxda ah hay'ad aan wasaarad hoos imaan.
.)"Mushaar"waxaa loola jeedaa lacagta uu shaqaaluhu bil kasta uu xaqa u
yahay in la siiyo.sida ku cad lifaaqa kowaad ee sharcigan "hay'ad
wladeed"waxaa loola jeedaa madaxtooyada dawlad goboleedka puntland ee
omaaliya , wasaarad, wakaalad. Warshad, dawlad hoose, bangiga ama
shruuc dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay.
Hawl qaran" waxaa loola jeedaa hawl kasta oo dawlad goboleedka punt-
d iska leedahay kana tarjumaysa danta guud ee dalka .
awsha iskaa wax u qabso waxaa loo yaqaan hawl goboleedka puntland..

## .Saamayn.-

.1)Sharcigani wuxuu saamaynayaa shaqaalaha joogtada ah ee dawladda
.Sharcigani ma saamaynayo:
)shaqaalaha aan joogtada ahayn iyo kuwa heshiisleyda ah.
)shaqaalaha ka tirsan hay'adaha lacagta .warshadaha iyo shirkaduhu waxay
ayaan sharci lam.65.
Dadka ka tirsan ciidmada qalabka sida iyo kuwa u qaabaysan sida ciidanka
dna sharcigani kuma dhaqmayo.

QAYBTA 11

# QAABKA

## Qaabka .-

1.jago kasta waxay yeelan doontaa darajo. Waajibaad iyo mas'uuliyad lagu aqoonsanayo magac kooban.

2.Tirada guud ee jagooyinka hay'ada ee loogu tala galay miisaaniyadda dawladda iyo jagooyinka aan lacag loogu tala galin waxay isku wada noqon-ayaan qaabka hay'addaasi.

3.HEERARKA.

1)waxaa jiri doona heerarka soo socda:

Heerka "A" iyo 'AY" maamule iyo aqoonyahan.

Heerka"B' Fuliye;

Heerka "F' Farsamo yaqaan oo ah qofka haysta shahaado dugsi sare iyo mid ka saraysa ee farsamo ama shahaado u dhiganta .

Heerka "C"Karaani;

Heerka "X'"xirfadle ama shahaado qiimayn xirfadeed;

Heerka "D"adeege, ilaaliye IWM.

2)Heerkastaba wuxuu yeelan doonaa mushaharada iyo darajooyinka ku tilmaaman lifaaqa 1aad ee sharcigan.

QAYBTA111

# SHAQO SIINTA ;

## Shaqosiinta

U shaqaynta dawladda, marka laga saaro ciidamadda qalabka sida iyo kuwa ciidan ahaan u habaysan. Waxaa lagula dhaqmayaa sida uu dhigayo sharci-gani (1);hase yeeshee, madaxweynaha D.G.PL ,wuxuu awood u leeyahay marka :

B)baahi weyni jirto ama

T)maslaxadda qaranka ay ku jirto.

J)iyo marka ay jiraan waxyaalo kale oo gaar ah inuu amro qorniin shaqaale iyadoo aan la amrin habka uu dhigayo sharcigani,

4.Shuruudaha laga doonayo qofka la qorayo

qofkasta oo shaqa dawladeed la siinayoo waa:

1.inuu ahaadaa degaanka Puntland

2.inuu da'diisu ka yarayn 15sanno.

3.inuu caafimaad taam ah qabo.

4.inuu asluub wanaagsan lahaadaa.

5.inuusan ahayn qof xafiisyada dawladda looga reebayo xukun ku dhacay awgii "interdeetto".

6.inuu lahaado shahaadooyin looga baahan yahay jagada loo qaadanayo, kuwaasoo kala ah;

i shahaado jaamacadeed ama mid u dhiganta marka jagadu tahay heerka

ii-shahaado dugsi sare oo caadiga ah ama mid u dhiganta marka jagadu tahay heerka "B10".

iii-shahaado dugsi sare uu la jiro tababar farsamo iyo shaqo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan labo sanno waxaa lagu qori doonaa darjada "B9";

iv-shahaadada dugsiga dhexe uu la jiro tababar farsamo iyo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan labo sanno, waxaa lagu qori doonaa "C10".

vi-shahaadada dugsiga dhexe ama shahaado la mid ah waxa lagu qori doon-aa darjada "C11";

vii-inuu haysto caddayn ah inuu qori karo akhrin karo afsoomaaliga.

7.Guddiga qiimaynta shahaadooyinka –si loo ogaado heerka ama qiimaha ay shahaadooyinku leeyihiin waxaa qiimaynaya guddiga qiimaynta .sha-haadooyinka ee hoos yimaada wasaaradda waxbarashada oo loo xil saaray shahaadooyinka la aqoonsan karo.

Guddigu wuxuu ka kooban yahay :

1.Agaasimaha guud ee wasaaradd waxbarashada

2.Guddoomiyaha xafiiska imtixaanaadka. Xubin.

3.Agaasinka waaxda qaabaynta wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha

4.Agaasinka waaxda qorshaynta wasaarada waxbarashada

5.Wakiil ka socda gudiyada goobaha shaqada.

8.Weydiin qoris shaqaale;

hay'adaha dawladda iyo hay'daha gaarka ahiba marka ay u baahdaan shaqaale waxay weydiisanyaan agaasinka shaqada iyo shaqaalaha D.G.PL.

2).Agaasinka shaqada iyo shaqaalaha haddii aanay lahayn shaqaale loo badeli karo hay'ada shaqaalaha soo warsaday waxay weydiinta ku faafi-naysaa wargaysyada.

Qorista shaqaalaha waxaa loo raacayaa habka shaqo qorista shaqaalaha shar-cigani tilmaayo.

3.Shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahnayn. Qoritaanka shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahnay,oo ay ka mid yihiin adeegayaasha,ilaaliyaasha IWM.oo loo qorayo hay'daha dawladda,shirkadaha iyo hay'adaha gaar ahaa-need. Waxaa qoritaankooda u xil saaran guddigga shaqo qorista ee goboladda iyo degmooyinka, kuwaasoo sin caddaalad ah u

4.u soo xulaya dadka buuxiyay shuruudaha ku xusan qod.6aad ee sharcigan iyo kuwa u gaarka ah jagooyinka shaqaalaha loo doonayo.

5.Sitayaasha shahaadada jaamacadda.qofkii aan horay dawladda ugu shaqayn jirin ee shaqo warsada, isaga oo sita shahaado lagu qiimeeyey jaamici ama wax u dhigma waa inuu soo maraa wakhtigii tijaabada shaqaalaha waxaa loo qori karaa shaqada iyaga oo aan soo mari imtixaan tartan ah.

6.Sitayaasha shahaadada dugsiga sare.sitaayaasha shahaadada sare ama wax u dhigma oo soo maray wakhtigii tijaabada shaqaalaha soona gutay waa-jibaadkii D.G.PL.waxaa loo qori karaa shaqada iyaga aan soo marin imtixaan tartan ah.(1).

7.Sitayaasha shahaadada dugsiga dhexe.–1)sitayaasha shahaadada dugsiga dhexe ama wax u dhigma waxay shaqada geli karaan marka ay soo maraan kuna guulaystaan imtixaan tartan ah.imtixaanka waxa maamulaya D.G.PL ee shaqo siinta ee ku xusan Qod.14aad ee sharciga.

2)Gudbayaasha imtixaanka ee dawladda ka shaqeeya waxaa la siinayaa tababar maamul iyo hannuunin intaanay shaqada bilaabin ka hor.

13.Shaqaalaha xirfadlayaasha ah –1 shaqa siinta shaqaalaha xirfadlayaasha ee aan sidan shahaado waxay ku

(1)-Eeg sharciga lam.3 ee 8.1.84

waxay ku xiran tahay imtixaan tartan ah oo uu qaado guddigga shaqa siinta ee D.G.PL.asagoo la kaashnaya dad aqoon u leh xirfadda imtixaanka loo qaadayo;

2.manhajka lagu imtixaanayo dadka wuxuu noqonayaa kan u dagsan qiimaynta xirfadlayaasha.

3.xirfadlayaasha imtixaanka gudba ee shaqada la qoro waxaa mid kasta lagu mushahar siinayaa heerka xirfadda u gudbay, hase yeeshee xirfadlaha lama siin karo marka uu shaqada galayo wax ka sarreeya xirfadle 2aad.

4.dadka ka gudba imtixaanka ku sheegan Qod.12aad iyo qodobkaan.hase yeeshee aan shaqo loo dirin jagooyinkii oo buuxsamay awgeed, waxaa lagu hayn karaa liiska kaydka ah mudo 6 bilood ah.mudada 6bilood ah gudaheeda.haddii hay;ad shaqaale u soo warsato jagooyinka la mid ah kuwii shaqaalaha kaydka ahi, imtixaankooda gudbay, shaqaalaha kaydka ahi imtixaankooda gudbay waaa shaqada la qori karaa iyaga oo aan imtixaan kale laga qaadin.

14.D.G.PL.ee imtixaanka shaqaalaha;

imtixaan kasta oo ku saabsan shaqaale lqo qorayo dawladda,shirkadaha iyo hay'adaha gaar ahaaneed, waxaa maamulaya guddigga dawlad goboleedka puntland ee imtixaanka shaqaalaha oo ka kooban:

B)wakiil ka socda agaasinka shaqada iyo shaqaalaha ee D.G.PL——Guddoomiye

T)wakiil ka socda gudiyada goobaha shaqada ee D.G.PL.haddii uu jiro xubin.

J.wakiilka ka socda wasaarada waxbarashada ———xubin

x.wakiil ka socda hay'ada shaqada loo qorayo———xubin.

Haddii codku is le'ekaado waxaa labo cod yeelanaya guddoomiyaha ama qofka ugu da'da weyn.

15.shaqaalaha looga baahdo gobolada iyo degmooyinka.

Sitayaasha shahaadada dugsiga dhexe iyo xirfadlayaasha looga baahdo gobolada iyo degmoyinka ka xarunta D.G.PL. waxaa qoraya wakiilada u jooga halkaasi hay'adaha lagu sheegay qodobka hore. Jagada hay'adii aan wakiil u joogin waxaa buuxinaya xoghayaha degmada.

16.CIQAABTA.

1)cid kasta oo qorta shaqaale nooc kasta ha ahaadeene isagoo aan soo marin habka shaqo siinta ee uu dhigayo sharcigaani haddii danbiga uu sameeyo aanu ahayn mid ka culus. Waxaa lagu qaadayaa danbiga ay ciqaabtiisu tahay xariga ilaa lix bilood ah ama ganaax lacageed oo dhan sh.s. 1000.000 ilaa 10.000.000 ama labadooda oo laysku daro, hase yeeshee xariga waa loogu badeli karaa lacag.

2)qofka shaqaalaha ee la qorayo isagoon la soo marin habka shaqo qorista oo sharcigani dhigayo waa laga saarayaa shaqada. Asagoon aan u dacwoon karin wax xaq ah.

3.qaadida dacwooyinka la xiriira qodobkan qaybtiisa kowaad waxa ku shuqul leh maxkamadda sare.

17.Qorida shaqaalaha D.G.PL.

waxay ku dhaqan gelaysaa xeer uu saxeexay madaxweynaha D.G.PL.marka qafka loo qaadanayo jago ah heerka "A" "AY"B.iyo F. ama xeerka agaasinka guud ee shaqada iyo shaqaalaha D.G.PL.marka heerku yahay C,X iyoD.(4).

18.Darajooyinka bilowga jaamiciyiinta lagu qaadanayo.

1)sitayaasha shahaado jaamici ah ama wax u dhigma waxaa lagu qorayaa darajada "A/8" oo bilow ah:

2.Aqoon yahanada jaamiciga ah waxaa lagu qorayaa darajada "AY"ee bilow-ga ah.

3.jaamiciinta mushaharkooda waxaa loo kala sarraysiinyaa hadba sida ay shahaadadooda iyo aqoontooda waayo aragnimo u kala sarrayso.

19.Darajooyinka bilowga ah ee fuliyayaasha iyo farsama yaqaanada;

1)Qofka sita shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah waxaa lagu qorayaa darajada "B10".hadduuse qofku dugsiga sare ka dib qaato tababar gaar ahaa-need ugu yaraan labo sanno. waxa lagu qorayaa darajada bilawga ah "B9"hase yeeshee haddii labo sanno ee tababar gaar ahaaneed ay u weheliso waayo aragnimo tababarka ka horreeya oo aan ka yarayn 3sanno waxaa la gaarsiin karaa darajada bilawga ah ee "B8".

2)Qofka sita shahaadada dugsiga sare ee farsamo ama qaata tababar gaar ah oo farsamo ugu yaraan hal sanno.ka dib markuu dugsiga sare ee caadiga ah dhameeyey,waxaa lagu qorayaa darajada bilowga ah ee "F3"

20.Darajooyinka bilowga ah ee karaaniyayaasha:

qofka sita shahaadada dugsiga dhexe ka dib qaata tababar aqoon gaar ah, ugu yaraan labo sanno.waxaa lagu qorayaa darajada "C10"

## QAYBTA IV

## TIJAABADA IYO RASMIYEYNTA SHAQO QORISTA

1.Mudada tijaabada shaqaalaha cusub

.Qofkasta oo shaqo dawladeed la siiyo wuxuu marayaa muddo tijaabo ah aan ka yarayn lix bilood kana badnayn hal sanno.

marka uu bilaabo shaqada madaxa hay'ada waa in uu qoraal ku ogeysiiyo dada qofku tijaabada ku jiro, iyo shuruudaha gaarka ah ee looga baahan ay qiimaynta wax qabadkiisa.

Shuruudaha shaqo qoridda lagu rasmiyeyn karo:

Qorida shaqaalaha cusub waxaa la rasmiyeyn karaa :

marka ay dhamaystaan mudada tijaabada (21);

na soo baxaan shuruudaha kaloo loo dejiyey oo lagu tilmaamay xubinta ee qod.21aad.

arkay mudada tijaabada dhamaato,madaxa hay'adda wuxuu caddaynayaa ka tijaabada ahi ka soo baxay shuruudihii;ayna habboon tahay in qorida smiyeeyo.

aqo ka saaridda qofka tijaabada ku jira :-

alaha cusub ee mudada tijaabada ku jira, madaxa [illegible]

guddigga shaqaalaha waa [illegible]

## QAYBTA V

# WAAJIBAADKA

24.Waajibaadka --qofka shaqaalaha ahi waa:

1)inuu wakhtigiisa iyo waxqabadkiisaba ku jeediyaa siduu uga soo bixi lahaa waajibaadka iyo xilka jagadisa ka saaran iyo hawlaha la xiriira ee madaxda hay'adda u xil saartay;

3.inuu inta karaankiisa ah waxba ka hagran hawsha loo xil saaray isagoo hoggaansan qodobada sharcigaani, nidaamka la dejiyey iyo danta guud saameeya:

4.inuu ixtiraamo xeerarka khuseeya shaqadiisa.

5.inuu u aqoonsado inay sir yihiin wararka shaqadda awgeed ku gaaro.

6.inuusan ka daahin saacadaha shaqada,waqtigana dhawro.

7.inuu maqlo ixtiraamana madaxda ka saraysa.

8.inuu si xilkasnimo ku jirto u dhowro una xannaaneeyo hantida dawladd.

25.Waxyaabaha ka reeban qofka shaqaalaha ah:

1)qofka shaqaalaha ah uma bannaana :

b-inuu ku kaco fal shaki gelin kara hufnaantiisa iyo inuu daacad u yahay dawladda iyo dalka.

t-inuu daabaco amaba suurta geliyo daabacaadda ku saabsan dawladda, amaba ka soo jeediyo khudbad ama warbixin rasmi ah oo siyaasadda dawl da ama arrimo ku saabsan nabadgelyada dalka, haddaanay taasi ka mid aha hawshiisa caadiga ah ama aanu fasax uga haysan madaxa hay'addiisa.

j.inuu isku mar wada qabto labo jago iyagoo aan si sharci ah loogu ogola

x.inuu weydiisto ama ka aqbalo deeq hay'ad ka baxsan kuwa ku shaqeey caawimaadda insaanka amaba ka qayb galo lacag ururin ujeedo kasta ha al tee hadduusan haysanin ogolaanshaha hay'addiisa;

kh.inuu aqbalo hadyad qiimo leh ama shahaado, hadduusan haysanin ogc laanshaha madaxda hay'adiisa,dhallin kara caadifnimo loogu soo gaban ka si looga faa'iidaysto,taasoo shaqadiisana wax yeelaysa.

r.inuu galo ganacsi amaba ka qayb galo abuuritaan horumarinta ama maaraynta bangi ama shirkad haddaanay taasi ka mid ahayn hawshiisa.

Sh.inuu arrimihiisa khaaska ah u maamulo si u keenta in uu caadiyan de low noqdo.

d.inuu ku kaco ama ku dhaliyo qof kale fara gelinta awooda siyaasadeed ama mid kaleba oo isaga u faa'iidaysa ama lidi ku ah qof kaloo shaqaalah mid ah awooddaas oo soo dhex gasha arrin isaga ama shaqaalaha kale khusaysa.

c.inuu u soo gudbiyo arji ama ogaysiis madaxda hay'adda isagoon soo n wadada toosan ee rasmiga ah.

q.inuusan ka tegin shaqadiisa isagoon ogolaansho hore ka haysan madax isa.

2.Qofka shaqaalaha ahi waa in uusan xubin qoyskiisa ka mid ah u ogola in uu falalka kor lagu soo tilmaamay ku koco.

26.DHAAR

Qof kasta oo shaqaale dawladeed ah marka uu shaqada bilaabayo wuxuu marayaa dhaarta soo socota.

Isagoo lagu dhaarinayo madaxda hay'adda horteeda;

Waxaa igu walaahi ah,igu billaahi ah,igu tallaahi ah in aan u hoggaansanaado cahdiga iyo sharciyada D.G.PL.

In aan hirgelinayo barnaamijka horumarinta waxsoo saarka dalka D.G.PL.

Anigoo hawsha lay xil saaray u gudanaya sida sharcigu farayo,anigoo muujinaya dadaal,xilkasnimo iyo eex la'aan, dhawrayana sirta dawladda, waxaana ku dadaali doonaa in aan dhawro nabadgelyada,sharafta iyo jiritaanka D.G.PL.

27.Magdhawga khasaaraha ay keenaan shaqaaluhu:

1.qofka shaqaalaha ah waa in uu magdhow dawladda ka siiyaa wixii khasaaro ah oo ka dhasha isagoo waajib gudan waayey dhibaatoyinka ka dhasha ku xad gudubka Qod.24aad iyo25aad ee sharcigan.

2.haday dhacdo in falka ama wax qabasho la'aanta qofka shaqaalaha ah ha u qasdiyo ama hawl yaraansho ha ka ahaatee,ay dhibaato uga dhalato dhinacyo kale,qofkaasi shaqaalaha ah iyo hay'adiisa waxay wadar ahaan mas'uul uga yihiin magdhowga la siinayo dhinacyada dhibaatadu gaartay, haday hay'addu bixiso magdhowga waxay markeeda xaq u yeelanaysaa in ay magdhawgaasi u raacdo qofka shaqaalaha ah ee dhibaatada u sabab ahaa.

28.Amarka aan sharciga waafaqsanayn:

marka qofka shaqaalaha ahi ka helo madaxa hay'adda amar aan sharciga waafaqsanayn waxaa laga doonayaa in uu madaxa dareensiiyo sida ay la tahay isagoo cadaynaya asbaabaha uu amarka sharci darro ugu sheegayo,haddii amarka la adkeeyo iyadoo qoraal ahaan lagu siinayo qofka shaqaalaha ahi waa in uu amarka fuliyo,hadduu amarku cawaaqib xun yeesho,waxaa mas;uul ka noqonaya madaxa amarka bixiyey.

29.Falka aan sharcigaan waafaqsanayn.

Waa waxba kama jiraan hadaan si kale loogu tala gelin, falkastoo uu shaqaaluhu ku kaco oo,aan waafaqsanayn waa waxba kama jiraan, sidaas awgeedna ma dhalin karo in dawladda loo raaci karo,qofka shaqaalaha ah oo falkaas ku kaca waxaa laga qaadayaa talaabo sharci ah.

30.Dayn dawladdu ku leedahay shaqaalaha.

Marka dawladdu qofka shaqaalaha ah ay deyn ku leedahay,waxaa lacagta lagu leeyahay laga goyn karaa mushaharkiisa,iyadoo bil walba laga goynayo waxaan ka badnayn 4tii meelood hal meel mushaharkiisa bisha, hadduuse qofku shaqada ka baxayo,sabab kasta ha ku timaadee lacagta lagu leeyahay oo dhan waxaa laga goynayaa lacagta uuu dawladda xaqa ugu leeyahay.

31.Fasax todobaadka iyo ciidaha;

1 ishaqaaluhu waxay xaq u leeyihin hal maalin oo nasasho ah oo sida caadiga ah ku beegan maalinta jimcaha(57Dast).

2 shaqaaluhu waxa kale ay xaq u leeyihiin nasasho maalmaha ciidaha ay [illegible] u aqoonsan tahay;

## QAYBTA VI

# FASAXA

32.Fasaxa sannadka

1)Qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u leeyahay soddon casho oo fasax ah sannadkiiba iyadoo uu mushahaarkiisuna u soconayo fasaxa waxaa caadiya la siinayaa sannadkasta oo uu shaqeeyay aakhirkiisa

2.madaxda hay'addu waa in ay qorsheeyaan habka fasaxa loo siin lahaa i goo tixgelinaya danta shaqada iyo shaqaalaha.

3.hase yeeshee haddii dawladdu dan guud awgeed u joojiso fasaxa waxaa kaydin karaa ila saddex sanno.

33.fasaxa lacag la'aanta ah :

qofka shaqaalaha ah waxa la siin karaa fasax lacag la'aan ah oowaxa ogo-laan kara wasiirka wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha marka ay warbixin helo hay'ada qofku ka tirsan yahay.

34.Fasaxa dhalmada :

1)Haweenta shaqaalaha ahi waxay xaq u leedahay ka sakow fasaxyada la tilmaamay qodobada 31,33,35,36.fasax dhalmo oo gaaray 4bilood.

Shardi waxa ah in haweentu keento caddayn dhakhtar dawladeed.

Labo bilood waxay qaadanaysaa dhalmada ka hor,labo biloodna waxay qaadanaysa dhalmada ka bacdi.

2.haweenayda shaqaalaha ahi fasax caadi ah ma laha sannadka ay qaadato fasaxa dhalmada.

35.Fasaxa bukaanka:

1.fasaxa bukaanka waxaa ogolaanaya wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha D.G.PL.

2.waxaa qofka la siinayaa musharhar buuxa lixda bilood ee hore ee fasax bukaanka, wixii lix bilood ka badanse waxaa la siinayaa mushahar badh ah laakiinse mushaharka waxba laga dhimaayo ilaa inta uu ka dhamaanayo fasaxa bukaanku, haddii jirada ama dhaawaca ay u sabab tahay shaqadii uu hayey.

3.shaqaalaha lama siin karo wax ka badan 10 cisho oo fasax jirro fudud a oo uu soo cadeeyey dhakhtar, wixii 10cisho ka badan waxa laga goynayaa fasax sanadeedka caadiga ah ee qofka..

36.fasaxa waxbarashada:

marka dawladdu garato in qof shaqaale ah la siiyo fasax waxbarasho ama tababar dalka dibediisa ah waxaa wasaarada waxbarashadu goynaysaa muc ay qaadanayso waxbarashada ama tababarka, iyadoo hay'adda qofka uu ka san yahay kala tashanaysa dhinaca tababarka.

Mudada la gartay in tababarka ama waxbarshadu qaadanayso qofku musl har ma laha. Waxase qoyskiisa la siinayaa deeq u dhiganta mushaharkiisa caadiga oo dhan.

37.Dib ula noqoshada fasaxa :

madaxa hay'adu, haddii shaqo awgeed looga baahdo wuxuu dib ugu yeer karaa shaqaalaha ku jira fasaxa ku xusan qodobka 32,33,iyo36,shaqaalaha yeerayo waxa ku waajib ah inuu wakhtiga loo qabtay xafiiska ku yimaado haddii aanay sabab la garawsan karaa aanay jirin.

hay'adaha dawladda isagoo dhagaystay talada guddi heer sare ah oo isag
magacaabay.
j.Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha x,r.iyo s, ee xubinta 1aad ee
qod.45aad ee sharcigaanku qaado shaqaalaha hay'adaha marka uu ka dha
gaysto talada wasiirka hay'adda.
2)Wasiirka hay'adda wuxuu awood u leeyahay inuu:
b.Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha j,kh,iyod ee xubinta 1aad e
qod.45aad ee sharcigaan ku qaado shaqaalaha hay'adda isagoo dhagayst
ada guddiga anshaxa iyo abaalmarinta ee hay'adda.
t.Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha b,iyo ee xubinta 1aad ee
qod.45aad ee sharcigaan ku qaado agaasimaha guud iyo shaqaalaha la m
ah ee hay'adaha hoos yimaada/
j.Uga jeediyo ra'yigiisa madaxweynaha, ciqaabaha anshaxeed ee ku xu
xarfaha x,r,iyo s. ee shaqaalaha hay'addiisa marka uu dhagaysto garows
talada guddiga anshaxa iyo abaalmarinta ee hay'adda.
3)Agaasimaha guud ee hay'addaha dawladdu wuxuu u leeyahay inay
ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha (b) iyo(t) ee xubinta 1aad ee
qod.45aad ee sharcigan ku qaado shaqaalaha hay'addiisa marka uu dheg
talada agaasimaha waaxda qofku ka tirsan yahay.
4)Guddiga anshaxa iyo abaalmarinta ee goboladu wuxuu ka kooban ya
b.Guddoomiyaha gobolka ——————————— guddo
t.Isuduwaha maamulka ee dawladda hoose——————— xoghaye
j.wakiil ka socda booliiska ——————————— xub
x.wakiil ka tirsan wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha meesha uusan jo
dhiisiga degmada.——————————— xi
kh.wakiil ka socda guddiga goobaha shaqada——————— xubin

5)Gudiga anshaxa iyo abaalmarinta ee gobolada wuxuu dhinaca ansha
shaqaalaha dawladda awood u leeyahay inuu:
b.Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarafka (b)iyo (t) ee xubinta 1aad
qod.45aad ee sharcigaan ku qaado shaqaalaha gobolkooda ka tirsan:
t.Ugudbiye wasiirka, hay'adda ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xara
ilaa (s) ee xubinta 1aad ee qod.45aad ee sharcigaan.
j.Denbiyada anshaxeed ee ka dhaca degmooyinka magaala madaxda g
ka baxsan, waxay u wakiilan karaan guddi hoosaadyo degmooyinka ka
oo talo guddiga uga soo jeediya:
6)Wasiirka markuu ka fiirsado talada gudiga gobolka garowsadana wa
ka qaadaa talaabooyinka ku xusan xarafka (b) iyo(j) ee xubinta 2aad ee
qodobkaan .
7)Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarafka X,R,S ee xubinta 1aad ee
45aad ee sharcigaan waxaa lagu hirgelinayaa xeerka madaxweynaha D
ama xeerka agaasimaha guud ee shaqada iyo shaqaalaha hadba sida hee
shaqaalaha uu kala yahay.

47.Habka qaadista dacwadaha asluubta:
1)Dacwad kastoo anshaxeed waa in loo gudbiyaa guddiga qaadisteeda
awood u leh, iyadoo qoran muddo bil ah gudaheed, laga bilaabo maalin
bigu dhacay, haddii kale wax ka soo qaad maleh.

2)daraja dhimida shaqaalaha heerkoodu yahay sida kuwa ku kala tilm xubinta 1aad I yo tan 2aad ee qodobka 40aad, waxaa lagu kala ansixina hadba sida uu kala yahay heerkoodu.

42.Ergin shaqaale
1)Ergintu waa wareejin ku meel gaar ah oo shaqaale lagu wareejinayo
b-Hay'ad dawladeed
t-dawladda hoose
j-hay;ad dawladdu qayb ku leedahay:
x-dawlad kale :

kh-hay'ad caalami ah
2)Hawsha shaqaalaha erginta ku maqan waxaa loo xisaabayaa hawl dawladeed.

43.Beddel:
1)Beddelaadu waa wareejinta shaqaale laga wareejinayo hay'ad loo wa naya hay'ad kale.
2)qofka shaqalaaha ah waxaa hay'addiisa laga bedeli karaa:
b.hadduu dheeraad ku yahay.
t.hadduu hay'ad kale ku waxtar roon yahay iyadoo xirfaddiisa la tixgeli
j.haday maslaxada D.G.PL.ku jirto.

3.Bedellaadu shaqaalaha mushaharkiisu waxna ku kordhin mayso waxn dhimi mayso.hase yeeshee, haday noqoto lagama maarmaan in mushahar isa wax ka dhinmaan.waa in agaasinka shaqada iyo shaqaalaha dib u qiimaysaa iyadoo tixgelinaysa,tacliintiisa, aqoontiisa guud iyo waaya ara madiisa.

ÿ4)Bedelka qofka shaqaalaha ahi wuxuu hirgelin karaa marka ay isla og laadaan madaxa hay'adda qofka laga bedelayoiyo agaasinka shaqada iyo shaqaalaha.

5)hase yeeshee madaxweynaha D.G.PL wuxuu awood u leeyahay inuu a in qofka shaqaale ah hay'ad laga bedelo ee mid kale loo beddelo.

6)Bedelka shaqaalaha heerkoodu yahay sida kuwo ku tilmaaman 1aad iy tan 2aad ee qod. 40aad.waxaa lagu kala ansixinaya hadba sida uu kala yal heerkoodu.

44.Kala mudnaanta shaqaalaha isku darajada ah:
kala madnaanta shaqaalaha isku darajada ah waxaa loo fiirinayaa kala m naanshahooda sida ay shaqada ama darajada ugu soo kala horrayeen.

# QAYBTA VIII

# ANSHAXA

45.Danbiyada iyo ciqaabaha:

1)ciqaabaha anshaxeed ee lagu qaadi karo shaqaalaha waxay noqon karaan:

b.Canaan qoran.

t.Ganaax aan ka badnayn mushaharkiisa 7cisho.j

j.Mushaharkiisa oo muddo aan ka badnayn bil laga gooyo, iyadoo loo raacayo habka ku qoran qodobka 30aad:

x.Shaqo iyo mushahar ka joojin aan ka badnayn 3bilood, muddadaasoo aan loogu xisaabin doonon hawlgabka iyoliitirka..

kh.ka daahin dallacaad.

d.mushahar ka dhimid gaari karta siddeedii meelba meel muddo aan ka badnayn 6bilood.

r.Hoos u dhigid darajo.

2)Ciqaabaha lagu sheegay xarfaha (b)ilaa(j)ee xubinta hore ee qodobkan, waxa lagu mutaysan karayaa danbiyada kala ah:

b.shaqo dayicid weyn ama hawl qabsasho naaqusta:

t.Amar diido loo qasday.

j.Ku xad gudub qodobada 24iyo 25 ee sharcigan;

x.dhaqan xumo keenta shaqo joogta ama qas gala shaqada;

kh.shaqo ka maqnaan cudaar la'aan

d.Udul qaadasho shaqaalaha hoose oo ku xad gudba nidaamka shaqada.

3)Ciqaabaha lagu sheegay xarfaha (x)ilaa(s) ee xubnaha hre ee qodobkan waxa lagu mutaysan karaa denbiyada kala ah:

b.ku xad gudub weyn oo awoodeed:

t.ku xad gudub culus ee waajibaad xafiis oo dhib u soo jiida hay'ad dawladeed ama dad gaar ah

j.ku tagri fal ama xatooyo xoolo dadweyne oo qofka shaqaalaha ah lagu aaminay.

x.Waydiisasho ama aqbalid laaluush lagu qaato hawl rasmi ah oo la qabtay ama la qaban doono..

Kh.Amar diido wayn

d.ku xad gudub sirta dawladda.

r.ka faa'iidaysi awoodda jagada si dan shaqsi ah loo gaaro.

4)Ciqaabaha denbyada kor lagu soo sheegay waa la hor dhigi karaa ama waa la dhimi karaa marka ay jiraan duruufo wax kordhinaya ama fududaynaya danbiga.

46.Qaadidda tilaabooyinka anshaxa

1)Madaxweynaha D.G.PL.ama cidda uu wakiisho wuxuu awood u leeyahay in uu:

b.Ciqaabaha anashaxa ee ku xusan xubinta 1aad ee qod.45 ku qaado shaqaalaha madaxtooyada D.G.PL. isagoo dhagaysfay talada guddigga anshaxa iyo abaal marinta ee madaxtooyada.()

t.Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha "J"ilaa (S) ee xubinta 1aad ee qodobka 45aad ku qaado agaasimayaasha guud iyo shaqaalaha la mid ah ee

2.Guddigu wuxuu qoraal ku ogeysiinayaa dacweysanaha taariikhda dacwada
ı gelayo,isagoo gaarsiinaya nuqul dacwada loo haysto ugu yraan 24saac ka
or intaan dacwadu furmin.nuqulkaas waa inuu ka muuqan karo fikrad ku
lan qofka waxa lagu soo eedeeyey.

3)Guddigu waa inuu:
b.qaadaa wixii cadayn ah oo eedaynta taageeraya ka dibna waa inuu qaadaa
ixii cadayn aha ee uu la yimaado qofka dacwada loo haysto kasoo xaq u leh
ɔob joog inuu ahaado marka dacwada iyo cadaynta la qaadayo si buuxdana
ku daafaco.
:.Hadalka qoraalka guddigu waa inuu koobaa wixii cadayn ah oo la qaaday
o sidii doodu u dhacday.
.Go'aanka guddigu waa inuu qoraal noqdaa,waana inay saxiixaan dhamaan
ıbnaha guddigu.
:.Guddiga anshaxu waa inuu galaa dacwada la hor keenay muddo 15maal-
ɔod gudahood ah si dhaqso lehna u dhameeyaan
h.Go'aanka ka soo baxa guddiga anshaxa waa in nuqul laga siiyaa qofka
intu khusayso,galkiisana nuqul la geliyaa nuqul kalena loo diro agaasinka
ıqada iyo shaqaalaha.

8.Shaqo ka joojin
)Madaxa hay'adda hadduu u arko dan guud, wuxuu shaqada iyo mushahar-
ka joojin karaa shaqaalaha lagu soo eedeeyey ciqaab anshaxeed ama mid
ıbiyee:
)Madaxa hay'addu wuxuu kaloo qofka danbiga ama anshaxa lagu soo
eyey shaqada ama mushaharka ka joojin karaa:
Haddii maxkamadi waaran (mandato di catura) u goysay.
Haddii ay cadaato in qofku danbiga lagu soo eedayey uu ku noqnoqnayo
ı la imanayo dhibaatooyin kale oo D.G.PL.waxyeelo u leh.
Mudada shaqada ka joojintu socoto,qofka mushahar lama siin karo hase
shee waxaa qoyskiisa la siin karaa waxaan ka badnayn nus mushaharkiisa
diga ah.
'.Joojin dacwo anshaxeed ilaa laga dhamaynayo dacwo ciqaabeed:
ıddii dacwad ciqaabeed oo lidi ku ah qof shaqaalaha ah maxkadu ka soco-
sla danbigaas dacwad anshaxeed lagama furi karo ilaa dacwadu maxka-
lda ka soo dhamaato. Haddii dacwada anshaxeed mar hore la bilaabay waa
ɔojinaya ilaa laga hubsado siday ku dhamaanayso dacwadda ciqaabeed.

.Ku qaadid dacwo anshaxeed shaqaalaha lagu waayo danbi ciqaabeed:
ıqaalaha si kama dambays ah dembi ciqaab loogu waayo, waxaa haddana
qaadi karaa dacwad anshaxeed haddii dacwada ciqaabta intay socotay
war helay waxyaalo waajib ka dhigaya in tilaabo anshax laga qaado.

## QAYBTA IX

# DHAMAADKA XIRIIRKA SHAQADA

51.Shaqo ka tagis

1)Qofka shaqaalaha ahi wuxuu dalban karaa shaqo ka tagis,isagoo ma
hay'adda arji hor dhigaya.Arjiga waa la noqon karaa qofku intaan la sii
jawaab lagu aqbalayo dalabkiisa.

2)Madaxda haya'adda,isagoo dhagaystay talada guddigga dalacaadda.
marinta iyo anshaxa ()waa diidaa karaa istiqaalada dan guud awgeed, h
cadaato inaan qofka shaqadiisa laga maarmayn.

3.Qofka shaqaalaha ah ee markii istiqaaladdiisa la diiday shaqada ka
waxaa lagu qaadayaa dacwad ay ku shaqo leedahay maxkamadda sare
D.G.PL.wuxuuna mutaysan karaa xarig ilaa iyo sannad ah iyo ganaax
3000 waxaana laga mamnuuci karaa inuu xirfadda uu yaqaan ku shaqa
muddo dhan5 sanno ah.

4)Shaqo ka tagista shaqaalaha heerkoodu kala yahay sida kuwa ku til
man xubinta 1aad iyo tan 2aad ee qod. 40aad waxaa lagu kala ansixina
habka ku tilmaaman isla qod.40aad.

52.Shaqo ku celin:

1)shaqaalaha ku sugnaada xaaladaha ku tilmaaman xarafyada B,T,iyo
qodobkan waxaa lagu celin karaa shaqaday hay'adda ka hayn jireen ha

i)shaqadooda loo baahan yahay

ii)jago habooni banaan tahay .

iii)mudaday shaqada horay u hayn jireen muujiyeen dadaal, karti iyo
nimo,iyadoo laga shidaal qaadanayo qof kasta galkiisa.

iv)Shuruudaha mid kasta u gaarka ahi ay u dhan yihiin kuwaas oo

B-Qofka shaqaalaha ah ee lagu xiray danbi aan xiriir la lahayn shaq
dawladda.

i)hadduu qorniin kaga codsaday hay'addii uu ka tirsanaan jiray shaq
celin muddo labo bilood gudahood ah marka laga bilaabo taariikhda x
laga siidaayey:

ii)Haddii xukunka lagu qaaday aanu keenayn shaqo ka reebid —-int
tions sida ku tilmaaman xarafka "T" ee qodobka 56aad ee sharcigan:

T-Sida ku cad qodobka 54aad ee sharcigan qofka shaqada markii ho
fariisiyey caafimaad xumo awgeed.

i)haddii guddi takhaatiir dawladeed oo agaasinka shaqada iyo shaqa
dirtay soo caddeeyaan in caafimaadkiisu wanaagsanaaday oo gaaray l
hawshiisa si caadi ah u gudan karayo.

ii)Hadduu qorniin ku soo codsado shaqo celin muddo labo sanno gu
ah marka laga bilaabo taariikhdii shaqada laga fadhiisiyey.

J-sida ku cad qodobka 51aad ee sharcigan,qofka shaqo ka tegis si sh
markii hore looga ogolaaday oo hal sanno gudaheed shaqo ku celin s
da, marka laga bilaabo taariikhdii shaqo ka tegista laga ogolaaday.

2).Awoodda go'aan ka gaarista codsiga shaqo ku celin waxa yeelana
digga D.A iyo anshaxa hay'adda waxaa lagu ansixinayaa xeer madax
aana xeer agaasinka guud ee shaqada iyo shaqaalaha.iyadoo loo raac
qodobka [illegible] ee sharcigan

3)Qofka shaqada lagu celinayo wuxuu xaq u yeelan karaa mushahar marka uu si rasmi ahaan shaqada u bilaabo.

4)Shaqaalaha ku xusan xarafka "B" ee qodobkan ee shaqo ku celinta loo oggolaado muddaday shaqada ka maqnaayeen waxa loo xisaabinayaa fasax lacag la'aan iyo xaq la'aan.

53.Shaqo ka fadhiisan da' awgeed:

1)Qofka shaqaalaha ahi wuxuu shaqada ka fadhiisanayaa :

b-markuu gaaro 60 sanno hadduu nin yahay

t-markay gaarto 55 sanno haddii ay haween tahay

2)Mararka qaarkood qofka shaqaalaha ah waxa loo ogolaan karaa inuu shaqada ka fadhiisto ka hor intuusan ka fariisan iyadoo la tixgelinayo haday jiraan duruufo gaar ahaaneed.

54.Shaqo ka fadhiisin caafimaad dartii-

a-shaqaalaha la garto, marka uu soo maro baaritaanka guddiga caafimaadka ee dawladda in uusan shaqayn karayn caafimaad darro awgeed, shaqada waa laga fariisin karaa iyadoo la siinayo wuxuu xaq u yeesho iyadoo sharcigaan la raacayo.

55.Shaqo ka fadhiisin dan guud awgeed:

1)Qofkastoo shaqaale ah shaqada waa laga fariisin karaa dan guud awgeed.

2)shaqo ka fariisinta waxaa lagu soo saarayaa xeerka madaxweynaha D.G.PL.qofka shaqada laga fariisinayayna waxaa la siinayaa xuquuqdii u bislaatay.

56.Shaqo ka saarid sabab anshaxeed:

Xukun maxakamadeed ama shaqo ka maqnaansho muddo dheer cudurdaar la'aan:

1)Qofka shaqaalaha ah waxa shaqada looga saari karaa sababaha soo socda:

b-Ciqaab anshaxeed oo uu ku qaaday guddi anshax

t-xukun maxkamadeed oo kama dambays ah oo ku saabsan ku isticmaalka xafiiska si loo helo macaash sharci darro ah, ama xatooyo xoolo dadweyne, khiyaano,tuugo,dhac,dembi kaloo qofka ka reebaya inuu qabto shaqo dawladeed inkastoo la cafin karo.

j-Markuu shaqada ka maqnaado muddo lix bilood gaaraysa cudur daar la'aan, maqnaanshaha qofku markuu lix bilood ka yar yahay waxaa lagu qaadi karaa ciqaab anshaxeed.

2)Shaqaalaha shaqo ka saaridiisa qodobkan loo cuskado xaq uma laha fasaxa caadiga ah ee sannadka ugu dambeeya.

57.Shaqo ka saarid xaq la'aan.

1)Danbiyada kale ee sharcigan ku xusan ka sakow, qofka shaqaalaha ah waxa shaqada D.G.PL.laga saari karaa xaq la'aan haday guddiga dalacaada,abaalmarinta iyo anshaxa ee hay'adda hortiisa kaga cadaadaan ciladahani:

Hakrasho,googayn iyo curyaamin shaqada dawladda isagoo tusaale xun u muujinaya shaqaalaha D.G.PL.si uu danihiisa gaarka ah u fushado.

2)Sugnaanshaha jiritaanka ciladaha lagu sheegay xubinta 1aad ee qodobka waxaa caddayntiisa loo xil saaray guddiga shaqaalaha iyo maamulka hay'adda oo wada jira.

QAYBTA X

# QAYBTA FARSAMO YAQAANKA

58.Macnaynta ereyada qaybta farsamo yaqaanada:
marka qaybta farsamo yaqaanada ee sharcigan laga hadlayo, ereyada h ku qoran waxaa loo fasirayaa sida eray kasta hortiisa ku qoran.

1)Shaqo(ocuupation) waa hawl qofka awood u siin karta inuu barto ka shaqeeyo gacanta ama maskaxda.

2)Farsamo(Trade –carft) waa hawl xirfadeed, una baahan in shahaado aqoonsi lagu kasbo, loona yeesho waayo aragnimo dhinaca xirfada gaca iyo tiyooriyada la xiriirta.

3)Farsamo barad (apprentice) waa qof ku jira tababar si loo gaarsiiyo l kaaliye xirfadle. Ama xirfadle aan ka mid ahayn hay'adda dawladda.

4)Kaaliye xirfadle,waa qofka shaqaalaha caadiga ahna ka xeel dheer,w aragnimada iyo aqoontiisuna gaarsiisnayn xirfadle.

5)Xirfadle (3aad) waa qofka waaya aragnimo, ama laylis ku kasbaday gacmeed, kana gudbay imtixaanka qiimaynta ee heerka saddexaad.

6)Xirfadle dhexe (2aad) waa qofka awood u leh cilad helid iyo bixin,i bedelid xubin qalab farsamo gudbayna imtixaanka qiimaynta xirfadda e ka labaad.

7)Xirfadle sare (1aad) waa qofka awood u leh cilad helid iyo bixin,ga kara sababtii cilada keentay kuna darsada tiyooriyadii loo baahnaa, gud imtixaankii qiimaynta xirfadda heerka kowaad.

8)Farsamo yaqaan (3aad) waa qofka haysta shahaadada dugsiga sare farsamada.ama shahaado u dhiganta.

9)Farsamo yaqaanka dhexe (2aad) waa qofka marka uu dhameeyey du sare ee farsamada qaatay:
b-ugu yaraan labo sanno oo tababar oo la xirriirta cilmiga shaqaddiisa ugu yaraan, tababar farsamo oo la xiriirta cilmiga shaqaddiisa kuna shaqeeyey farsamada ugu yaraan labo sanno oo tababarka ka baxsan.

10)Farsamo yaqaan sare (1aad) waa qofka isagoo haysta shahaadada ga sare ee farsamada, qaatay ugu yaraan saddex sanno oo tababar farsa aqoonsan yahay kuna shaqeeyey farsamaddiisa ugu yaraan saddex sanr tababarka ka bacdi.

11)Aqoonyahan.(jaamici professional) waa qofka haysta shahaado jaa ah oo farsamo.

12)Qaybta farsamo yaqaannada waxaa loola jeedaa qaybta sharciga e maamulayo farsamo baradka,kaaliye xirfadle,xirfadle, farsamo yaqaan aqoon yahanada. Ereyga farsamo yaqaanada waxaa guud ahaan loo isti maalayaa arrimaha qaybta sharcigani saamaynayo oo dhan, iyo farsam yaqaanada F.3,F.2 $ F.1 marka si gaar ah loo tilmaamayo:

59.Maamulka farsamayaasha
Shaqaalaha farsamo yaqaanka ah waxaa loo dejiyey qaybta sharcigar gaar ah oo lagu maamulayo darajooyinkooda, jagooyinkooda iyo musl harkoodaba sida ku cad lifaaqa labaad ee sharcigan.

60.Maamulka farsamo yaqaanka:

1)Darajooyinka farsamo yaqaanka waxay u kala qaybsan yihiin sida soo socota:
b-Aqoon yahan:
t-Farsamo yaqaan:
j-Xirfadle
x-Kaaliye xirfadle
kh-Farsamo barad.
2)Jaga kasta waxay leedahay darajooyin kala duwan. Mushahaaro bilow ah iyo miday ku dhamaato.
3)Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha farsamo yaqaanada, iyadoo loo tixgelinaayo heerka imtixaanka uu u gudbay ama shahaadada farsamada ee uu sito, ayaa lagu meelayn doonnaa darajada ku habboon ee ku xusan lifaaqa labaad ee sharcigan.

61.Dallaacaad:
1)Farsamo yaqaanada waxay xaq u leeyihiin dallacaad darajo:
2)Dallacaada darajada waxaa lagu mutaysan karaa:
b-imtixaan uu qofku ku guulaystay:
t-Marka qofku la yimaado shahaado ka sarraysa tii hore uu u sitay (cambiamento di categorio).
3)Qofkii muujiyey karti, daacadnimo iyo hawl karnimo dheeraad ah qayb weyna si muuqata uga qaatay horumarinta D.G.PL.waxaa la siin karaa dalacaad gaar ah (spcial merit)
4)Qofka farsamo yaqaanka ah darajada uu joogo lagama dalacsiin karo haddii uusan la imaan shuruudaha ku cad qodobkan. Qodobkan erayada farsamo yaqaanadu iyo farsamo yaqaanka waxaa loola jeedaa shaqaalaha qaybta sharcigani saamaynayo oo dhan.

62.Imtixaan
qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha xirfadlaha ah labadii sannaba mar baa imtixaan laga qaadi karaa, si loo qiimeeyo heerka aqoontiisa:
Qofkii imtixaanka galaya, waxaa shardi ah in ay madaxdiisu labada sanno ee imtixaanka ka horaysa u gartaan in qofkaasi uu istaahilo in imtixaan laga qaado, iyadoo la tixgelinayo sida uu u guto waajibaadkiisa, asluubtiisa iyo hawlkarnimaddiisa.
Qofka imtixaan galaya, waxaa shardi ah in ay madaxdiisu labada sanno ee imtixaanka ka haerraysa u gartaan in qofkaasi uu istaahilo in imtixaan laga qaado, iyadoo la tixgelinayo sida uu u guto waajibaadkiisa,asluubtiisa iyo hawl karnimadiisa.

63.Heerka aqoonta xirfadlaha:
1)Qofka xirfadlaha ah ee doonaya inuu u gudbo farsamo yaqaan, waa inuu farsamada uu u go'doomay u yaqaan toori ahaan ama baratikal ahaan, isticmaali karaäna kutubta iyo nakhshadaha farsamadaasi la xiriirta.
2)Xirfadlaha waa inuu ugu yaraan labo sanno ku shaqeeyaa darajada kowaad ee xirfadlaha,imtixaanka farsamadana ku guulaystaa, inta uusan u gudbin darajada ka sarraysa mida uu joogo.
3)Xirfadlaha kowaad (ama sare ee u dalaca farsama yaqaan,lacagtii uu ku qaadan jirey darajada xirfadlaha waxba ka go'imaayaan,hase yeeshee jaga ahaan wuxuu gelayaa heerka farsamada oo uu imtixaankooda ku guulaystey:

4)Xirfadlaha darajada kowaad jooga ee aqoon iyo waaya aragnimo dhee leh, si joogto ahna looga soo qoray warbixin wanaagsan, kana gudbi waa imtixaankii. Uu farsamo yaqaanka ugu gudbi lahaa, hawshana aan looga maarmin,3sannaba mar baa heerka mushaharkiisa kor loo qaadi karaa ilaa gaarsiinayo heerka ugu sarreeya ee xirfadlaha.

64.Farsamo yaqaan sare ee ugudbay aqoon yahan:

1)Farsama yaqaanka sare ee u gudbay aqoonyahan, lacagtii uu ku qaada jiray jagada farsamo yaqaanimada waxba ka go'imaayaan hase yeeshee, ahaan wuxuu gelayaa ta ugu hoosaysa oo aqoonyahanka.

2)Farsamo yaqaanka sare ee aqoon iyo waaya aragnimo dheer leh, si j ahna looga soo qoray warbixin wanaagsan, kana gudbi waayey imtixaan ugu gudbi lahaa aqoonyahan hawshana aan looga maarmin saddex sanab baa mushaharkiisa kor loo qaadi karaa ila la gaarsiiyo heerka ugu sarra farsamo yaqaan.

65.Aqoonyahannada:

Aqoonyahannada jaamiciga ah mushaharkooda bilawga ah waxaa loo saraysiin karaa hadba sida shahaadadooda iyo aqoontooda waayo arag kala sarrayso.

66.Shahaadada dugsiga dhexe

.Qofka isagoo haysta shahaadada dugsiga dhexe qaatay tababar gaar a farsamo ugu yaraan labo sanno, wuxuu la mid yahay farsamo yaqaan F.

67.Shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah:

Qofka isagoo haysta shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah, qaatay ta gaara ee farsamo yaqaan hal sanno. Ama ka gudbay imtixaanka farsam yaqaanka wuxuu noqonayaa farsamo yaqaanka F.3.

68.Qoritaanka farsamo baradka:

1)Xirfad kasta ama farsamo kasta waxay lahaan kartaa ama loo qori k shaqaale farsamo barad ah oo tababar ku qaata xirfadda,

2)Marka tababarka loo qaadanayo qoritaanka farsamo baradka waxaa raacayaa habka shaqo qorida ee shaqaalaha aan aqoon gaara looga baa

3)haddii miisaaniyadu ogoshahay hay'adaha dawladda waxay qof ka farsamo barad ah siinayaan gunno gaaraysa sh.so.120shilin.

4)Qofka farsamo baradka ahi wuxuu xaga badbaadada shaqaalaha ka yahay qofka uu xirfadda ka baranayo.

5)Marka tababarka u dhamaado, haddii hay'adda ay farsamada ka ba ama hay'adda kale ee dawladeed shaqada farsama baradka u baahato laga qaadi karaa imtixaan u gaar ah kooxda ama kooxaha farsamo bar ee shaqadooda loo baahan yahay.

69.Guddiga Farsamada ee dawlad goboleedka puntland:

1)Si qaybta farsamo yaqaanka ee sharcigan si habsami ah loogu hirg waxa la dhisay guddiga farsamada ee dawlad goboleedka puntland o kooban wasiirada wasaaradaha soo socda:

b-wasiirka wasaarada shaqada iyo shaqaalaha

t-wasiirka wasaarada ganacsiga iyo warshadaha

j-wasiirka wasaarada hawlaha guud iyo gaadiidka

2)Xoghayaha guddigga farsamada ee dawlad goboleedka puntland waxay noqon doontaa agaasinka guud ee shaqada iyo shaqaalaha.

3)wasiiraddu waxay socod siinta hawlaha caadiga ah u wakiilan karaan agaasimayaasha guud iyo agaasimo waaxeedyada ee wasaaradahooda oo uu guddoomiye u noqonayo agaasimaha guud ee shaqada shaqaalaha.waxaa kaloo guddiga ka qayb galaya wakiil ka socda guddiyada goobaha shaqada ee D.G.PL.

70.Xilka guddiga farsamada ee D.G.PL.

1)Xilka iyo hawsha guddiga D.G.PL. ee farsamada waxay tahay :

b-inuu dejiyo qorshaha imtixaanka xirfadlayaasha.

t-inuu qiimeeyo shahaadooyinka aqoonyahananda iyo farsama yaqaanka

j-inuu ka qaado shaqaalaha imtixaan lagu qiimaynayoaqoonta qof kasta ee xirfadle ah.

x-inuu bixiyo shahaado xirfadle.

Kh-inuu dejiyo barnaamijka tababarrada shaqaalaha xirfadlayaasha ah iyadoo lala kaashanayo hirgelinta tababarada hay'adaha ku shaqa leh (kuwa farsamada).

2)Guddiga farsamada ee D.G.PL. waxay kaloo awood u leeyihiin in ay magacaabaan guddiyo hoose oo ka kooban dad farsamo yaqaan ah, si ay imtixaan uga qaadaan dadka xirfadlayaasha ah ee qaybta farsamo yaqaanka ee sharcigan tilmaamayo.

71.Dhaqan galinta sharcigan:

Shaqaalaha farsamo yaqaanka ahi qaybta sharcigani ka sakow waxay u hoggaan samayaan sharciyada shaqaalaha xagga qoritaanka,anshaxa,hawl qabadka, shaqo ka saaridda iwm. Oo la xirriirta guud ahaan maamulka shaqaalaha ee aan lagu xusin qaybta farsamo yaqaanka ee sharcigan.

72.Liiska farsamada la aqoonsan yahay:

1)Magacyada iyo tirada farsamooyinka oo ilaa hadda la aqoonsan yahay waa kuwa ku usan lifaaqa saddexaad ee sharcigan.

2)Haday soo baxaan farsamooyin aan ku xusnayn lifaaqa sadexaad ee sharcigan marka guddiga farsamada hubsado jiritaankaas waxaa lagu kordhin karaa liiska farsamooyinka ee sharcigan ku lifaaqan.

## QAYBTA XI

# BADBAADADA SHAQAALAHA IYO GUNNOOYINKA:

73.Badbaadada shaqaalaha:

Badbaadada shaqaalaha waxaa loo raacayaa sharciga tirsigiisu yahay 49 ee soo baxay 8dii ogosto 1970 oo ku saabsan wakaalada shaqaalaha iyo wixii badalaad iyo kordhin lagu sameeyey (eeg sharci 76.7.12.1972).

74.Gunnooyin:arrimaha ku saabsan gunnooyinka:-

waxaa lagu dhiqi doonaa sharciga tirsigiisu yahay 2 ee soo baxay 5.1.1976 ee ku saabsan gunnooyinka shaqaalaha iyo wixii badalaad iyo kordhin lagu sameeyey.

QAYBTA XII

# HAWLGABKA IYO LIILITIRKA

75.Nidaam guud:

1)Nidaamka guud ee hawl gabka iyo liilitirka waa sida soo socota:

b-hawl gabka la siinayo shaqaalaha si joogto ah uga hayay xafiis jo shaqada dawladda muddo 20 sanno ama in ka badan waa:

i-40% mushahaarka asaasiga ah hadduu shaqeeyey 20 sanno iyo ka laakiin aan gaarin 25 sanno.

ii-50%mushahaarka asaasiga ah hadduu shaqeeyey 25sanno iyo ka in aan gaarin 30sanno iyo ka kor.

t.shaqaalaha aan muddo hawlgab gaarin laakiin si joogto ah uga hay joogto ah shaqada dawlada 10sanno ama in ka badan,waa la siinayaa ay shaqada ka joogsadaan,xaq liilitir ah oo ku xisaabsan bil mushaha asaasiga ah sanad kasta oo ay shaqeeyaan.

2)Mudada lagu mudanayo hawlgabka ama xaqa ku tilmaaman xubi ee qodobkaan waxaa laga soo bilaabayaa 1/8/1998 ama taariikhdii qo shaqada joogtada ah bilaabay hadba tii dambaysay,

3)marka sharcigaan laga hadlayo mushaharka asaasiga ah waxa loo mushahar bileedka ee asaasiga ah oo uu qaadanayey markii uu shaqa dhamaatay qofka iyadoo laga reebayo gunnooyinka oo dhan wax kast ahaadeene.

4)Nidaamka guud ee hawl gabka oo uu sharcigaani dhigayo hay'ada dawlada xaq laguma yeelan karo waxa ka badan hal hawlgab hase yee haddii ay dhacdo in qof shaqaale ahi, ka dib markii uu qaatay hawlga uu dib shaqo dawladeed u bilaabay, waxa mudada shaqadaan danbe lo xisaabinayaa mid aan joogto ahayn wuxuuna xaq u yeelanayaa liilitir gaarta hadba mudada uu shaqeeyey.

1)haddii waalidiin hawlgabeen ahi ama mutaystay hawlgab ay ku tin geeriyi carruurta ay ka tagaan waxay xaq u yeelanayaan oo kaliya hal gab, ayagoo qaadanaya labada hawlgab kii u badan.

76.wayatiin hawlgab iyo liilitir qofka shaqada laga saarayo anshax a xarig.

1)Hawlgab ama liilitir waa inaan la siin sarkaalka shaqada laga eryo ha soo socda:

b-talaabo anshax.

t-xukun maxkamadeed, haddii lagu qaado,xukumo dacwad/ciqaab ah ka dhalatay jagada rasmiga ah oo ka faa'iidaysasho aan sharci ahayn l isticmaalo, xatooyo xoolo dadweyne,musuqmaasuq,tuugo khiyaamo, i danbi kasta oo ka reebaya qofka shaqaalaha ah inuu hayo jago dawlad

2)hase yeeshee, waxa la siinayaa qofka shaqaalaha ah lacagtii uu u bi hawlgabka ama liilitirka.

77.shaqo ka ruqsaysi:

1)Qofka shaqaalaha ah ee iskiis uga ruqsaysta shaqada dawladda lam karo hawlgab(75)hadduusan dhaamaysan 25sanno oo shaqo dawladeed xiriirta amase da'diisu ayan gaarin 50sanno,hase yeeshee waxa la siin liilitir(75)hadduu shaqeeyo 10sanno ama in kabadan oo xiriir ah iyado

2)Qofka shaqaalaha ah oo shaqeeyaey muddo ka yar 10sanno, isla markaana si sharci ah looga ogolaaday shaqo ka tagista wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo lacagtii looga goyn jiray hawlgabka.

78.Maaliyadda hawlgabka:

1)Maaliyada ku baxaysa hawlgabka shaqaalaha dawladda waxaa habaynaysa wasaaradda maaliyadda.

2)Maaliyadda hawlgabka waxa lagu maamulayaa xeer uu soo saaray madaxweynaha D.G.PL.iyadoo uu tixgelinayo talada wasiirka wasaaradda maaliyadda iyo go'aanka golaha wasiirada.

3)qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda wuxuu ka bixinayaa 5%)mushaharkiisa asaasiga ah si loogu daro maaliyadda hawlgabka.

4)Dawladu bil walba waxay ku kordhinaysaa maaliyadda hawlgabka 3%)mushaharka asaasiga ah ee qofka shaqaalaha dawladda ah lacagtaasi waxa loogu talagalayaa madax-xigaha ku habboon ee miisaaniyadda dawladda, lamana wareejin karo si kharash kale loogu bixiyo.

79.Hawlgab naafanimo

1)Haddii qof shaqaale ahi uu shaqada ka fariisto naafo ku gaartay awgeed isagoo fulinaya hawsha loo xil saaray ama waxa la xiriira naafadaas oo ah mid la hubiyey in ay joogto tahay, waxa la siinayaa hawlgab sida qodobka 5aad ee sharcigaani sheegayo, in kastoo mudada uu shaqeeyey ka yar tahay 0sanno, iyadoo la tixgelinayo in hawlgabku u kordhinayo sida soo socota.

b-10%haddii naafadu ka hoosayso 20, ama ay tahay naafo fudud;

t-20%haddii naafadu u dhaxayso 20%—35% ama ay tahay naafo dhexe.

J-70%haddii naafadu ka sarrayso 35% ama ay tahay naafo culus.

2)Ugu badnaan hawlgabka asaasiga ahi marka laga reebo waxa ku kordha 'aa inaanu ka badan 60% mushaharka asaasiga ah guud ahaanna iyadoo loo eeyey waxa ku kordhay haddii naafo culisi jirto waa inaau ka badnaan 80% ıushaharka aasaasiga ah. Heerka ay gaarsiisan yahay naafaddu waa ianay ıgtaa guddiga joogtada ah ee caafimaadka (astanding medical board)oo ay ıagacawdo wasaarada caafimaadka.Dadka go'aanada guddigaas ka eed sheeanaya waxa xaq u leeyihhn inay racfaan u qaataan guddigga racfaanka caafiıaadka ee joogtada ah(standing appellate medical board).go'aanka guddiga ıcfaanka waa kama dambays.

80.Horumarinta hawgab:

shaqaalaha hawlgabku u sugnaaday qod.75aad ama 79aad ee sharcigaan hadii uu qoraal ku codsado, intaanu shaqada ka fariisan waxa horumarin loo siin ıraa ¼.hawlgabkiisa oo lagu dhuftay 120. Hawlgabka soo haray oo ah ¾ axa la siinayaa bilkasta dhamaadkeeda.

81.Qofka shaqaalaha ah oo shaqo dawlad goboleedka ku geeriyooday:

Qofka shaqaalaha ah ee mutaystay hawlgab wlina shaqaynayey uu geeriyodo, dhaawac gaaray isagoo gudanaya hawshii loo xil saaray ama waxa la riirta awgeed, waa in la siiyaa dadkii dhaxalkiisa lahaa deeq u dhiganta sanno mushaharkiisii asaasiga ahaa.carruurtiisana waxay mutaysanayaan ıqa ku tilmaaman qod.82aad ee sharcigaan.

Haddiise qofkaasi aanu ka tegin carruur, hase yeeshee ay jiraan waalidiin iyo weeenay aan meel kale wax ka soo gelin. Habkii wax lagu siin lahaa waxaa

lagu gaarayaa go'aan gaar ahaaneed oo uu jeediyo wasiirka wasaaradda maaliyadda.

2)Haddii qofka shaqaalaha ah oo jago hawlgab ku jiray laakiin aan weli hawlgaba mutaysan uu geeriyooda, dhaawac gaaray isaga oo gudanaya ha shii loo xil saaray ama wax la xiriira awgeed waxa dadka dhaxalkiisa leh lagu siinayaa habka ku tilmaaman xubinta 1aad ee qodobkaan.

3)Qofka shaqaalaha dawladda ahi hadduu ku dhinto xarbi, isagoo gudan: hawl dawlad goboleed ama ku dhinta goob dagaal isagoo daafacaya dalkiisa,waxaa lagu xaq siinayaa sida uu dhigayo qodob.19aad xubintiisa 1aad,iyo tan 2aad ee sharcigan.hawlgabka iyo liilitirka ee ciidamada qalab sida,lambarkiisuna yahay 6 soona baxay 31-12-1969.

82,xannaanada carruurta waalidkood dhintay:

1)Haddii qof hawlgab ahi dhinto carruurtiisu waxa xaq u leedahay hawl-gabkiisa bil walba ilaa ilmaha ugu yari ka gaarayo 18 sanno.

2)Qofka shaqaalaha ah ee mutaystay hawlgab walina shaqaynayey hadd: ku timaado geeri caadi ah, waxa carruurtiisa lagu dhaqayaa sida ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan.

83.Geerida caadiga ah ee shaqaalaha aan hawlgab lahayn:

Haddii qof shaqaale ah oo aan hawlgab xaq u lahayni u dhinto geeri caadi ah,dadka dhaxalkiisa lihi waxay xaq u leeyihiin lacagta u dhiganta bil musł harkeeda asaasiga ah sanadka kasta oo uu shaqeeyey(75).

84.Waayitaan iyo joojin hawlgab.

1)Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab ay maxkamadi ku xukun xarig isagoo shaqada dawladda ku jira ayna ku caddaadaan danbiyada ku xusan ~~xarafka~~ "T" ee qodobka 56aad ee sharcigan, wuxuu isla markiiba, waayayaaa xaqa hawlgabka, hase yeeshee waxa loo celin karaa lacagtii haw gabka looga goyn jirey.

2)Haddii qof shaqaale ah mutaystay hawlgab sida sharcigani qoray, ama hawlgabeen ah lagu xukumo dembiyo liddi ku ah D.G.Puntland sida ku xusan qaybta 1aad,buugga labaad ee xeerka ciqaabta,ciqaabtiisuna keeni kar dil,xabsi daa'in ama xarig aan ka yarayn 10 sanno,wuxuu isla markiiba waayayaa xaqa hawlgabka.

Haddii qof shaqaala ha oo mutaystay hawlgab, sida sharcigani qorayo, ama hawlgabeen ah ay maxakamaddi ku xukunto xarig uga yimid dembi ka duw: kuwa ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan keeni karaya shaqo ka reebid mud daysan.(temporary interdictions) waxa laga joojinayaa xaqa hawlgabka mud: da uu ku sugan yahay xaaladda shaqada ka reebaysa.

85.Ogolaanshaha iyo bixinta hawlgabka iyo liilitirka:

Marka xiriirka shaqada ee ka dhexeeya qofka shaqaalaha ah iyo hay'adda dhamaado hawlgabka ama liilitirka (75) waxa ogolaanaya agaasinka guud ee shaqada iyo shqaalaha iyo hay'addii uu u shaqaynayey qofku, waxaana bixi-naysa wasaaradda maaliyadda.

2)Hawlgab ama liilitir maxkamaddu way joojin karaa dayn ama waxyaabo kale oo dawladdu qofka ku leedahay awgeed, maxkamadda waxay amar ku bixin kartaa joojin si loo gudo dayn laga galay dad gaar ah taasoo waafaqsan xeerka madaniga ah.

87.Shaqaalaha shaqo dibada ah ku maqan:
Shaqaalaha dawladeed ee shaqada dawlad goboleedka puntland dibada loogu diro, haddii ay dhibaato hawshaas loo diray uga timaado,dhibaatadaas awgeedna ay u suuroobi weydo inuu ku soo noqdo D.G.PL, xaaskiisa ama carruurtiisa waxaa la siinayaa mushaharkii uu qaadan jirey ilaa iyo inta uu uga soo noqon karayo dawlad goboleedka ama la hubinayo xaaladdiisu sida ay ku sugan tahay.

88.Habaynta shaqaalaha hawlgabay:
Mushaharka ay qaataan ka yar yahay kan sharcigan tilmaamayo, hase yeeshee, qofka hawlgabkiisu aanu ka yarayn hawlgabka sharcigani tilmaamayo wuxuu qaadan karaa hawlgabka uu haatan qaato.
89.Hawlgab mutaysiga:
Shaqaalaha ku jira heerka "C" "X" iyo "D", waxay qaadashada sharcigan tilmaamayo mutaysan karaan saddex sanno ka dib taariikhda sharcigani dhaqan galo.

90.BURIN:
Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan.
91.Dhaqan gelid:
sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha dawlada goboleedka puntland.
Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee dawlad goboleedka puntland.

MADAXWEYNAHA DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND.

MAXAMUUD MUUSE XIRSI.

# HABKA FARSAMO YAQAANADU UGU GUD-BAYAAN FARSAMO YAQAAN DHEXE IYO KAN SARE:

Darajo tababar shaqo wuxuu noqonayaa:

1.Farsamo yaqaan 1sanno 2sanno————-F.dhexe
2.Farsamo yaqaan 2sanno————————-F.dhexe

tababar shaqo wuxuu noqonayaa 4sanno———F.sare
————————————3sanno——-F.sare
————————————3sanno——-F.sare

# LIFAAQA 3AAD

Lifaaqa farsamooyinka la aqoonsan yahay:
Halkan waxaa ku taxan farsamooyinka ilaa hadda loo aqoonsaday in ay xeerka sharciga farsamooyinka waafaqsan yihiin.

1)FIISIKAL SAYNISYAHAN:
1.kiimikiste
2.fisigiste
3.farsamo yaqaanka cilmiga fisigiskada.

2)HINDISE YAQAAN DHISMO,INJINEERO IYO FARSAMO YAQAANADA LA XIRIIRA HAWLAHA.
Hnidise yaqaan iyo magaalo dejiye
Injineer dhismo
Injineer koronto iyo elektaroonik;
Injineer makaaniko
Injineer kiimiko,
Injineer macdanta birta
Injineer macdan qode
Injineer warshado yaqaan,
Dulsimayaal
Naqshad sameeye iyo guuriye
Farsamoyaqaan injineernimada dhismaha
Farsamo yaqaan koronto iyo elektaroonik
Farsamo yaqaan injineernimada makaanikada
Farsamo yaqaan injineernimada kiimikada
Farsamao yaqaan macdanta birta
Farsamo yaqaan qodida macdanta

3)MADAXDA DAYUURADAH IYO MARAAKIIBTA:
1.Duuliyayaasha dayuuradaha, hoggaamiyayaasha maraakiibta iyo injineernimada duulista.
2.Madxada hagayaasha maraakiibta iyo dayuuradah
3.injineer markab.

4)SAYNISYADA NAFLEYDA IYO FARSAMO YAQAANADOODA:

4.Farsamo yaqaanada sayniska nafleyda.
5)TAKHAATIIRTA DAAWADA,ILKAHA IYO XOOLAHA;
Takhaatiirta daawada
Taakhaatiirta ilkaha.
Kaaliye takhtar
Takhaatiirta xoolaha
Kaaliye takhatar xoolo
Daawo diyaariye
Kaaliye daawo diyaariye
Cunto yaqaan iyo nafaqo yaqaan caafimaadka guud.
Kalkaaliye aqoonyahan,
Kalkaaliyayaalfarsamo yaqaan.
Uumuliso aqoonyahan
Umuliso farsamo yaqaan.
Farsamo yaqaanka indhaha iyo diyaarinta muraayadda indhaha.
Fisiyoterabiste iyo terabiste.
Farsamo yaqaan raajo.

6)XARDHAYAAL IYO SAWIRLAYAAL.
1.Xardhayaal;
2.Filimqaadayaal iyo sawirlayaal.
7)BEERALEYDA,XOOLODHAQTADA,SEEROLAEYDA,KALLU-
UMAYSATADA IYO UGAARSATADA:
16:Beeridda badarka iyo khudaarta
17.Beeridda miraha kala geddisan
18.Farsamo yaqaanka dhaqidda xoolaha.
19.Farsamo yaqaanka caanaha xoolaha
20.Talaalka beeraha
21.Ku shaqaynta makiinadaha beeraha.
22.Dhaqaalaynta iyo abuuridda dhirta.
23.Kalluumaysiga
24.Dhaqidda digaagga.

3)WAX SOO SAARKA IYO KU SHAQAYNTA MAKIINAHADA TACAB
)O SAARKA;
!5.Qodida ceelasha iyo macdanta
6.Farsamo yaqaanka macdanta iyo dhagaxa.
.SOO SAARIDA BIRTA.
7.Dhalaalinta birta,baddalka iyo sifaynta moofada:
8.Kasamaynta birta dhalaalsan qalab,
).KU dhalaalinta moofada.
).Samaynta birta.
.Adkaynta birta.
.Ka samaynta birta tuubooyinka iyo xarkaha korontada.
.Macdanaynta qalabka birta iyo dahaaridda (coatets).

)IYAARINTA QORYAHA IYO SAMAYNTA WARQADAHA:
'samada diyaarinta qoriga .
ishaaraynta qoriga

Xaallufinta qoriga.
Samaynta warqadaha.

3.KU SHAQAYNTA KIIMIKADA:

34.Waqiijinta, budaynta iyo qaldada kiimikada (grinders and mixers).
35.Karinta u umada iyo dab yaqaanka (Roasters and heat treaters)
36.Shaadhaynta iyo kala soocid-yaqaanka (Filters and separatar operators).
37.Safaynta batroolka.

4.FARSAMO YAQAANKA MIIQIDDA, FALKINTA IYO KA SHAQAYNTA DHARKA.

Diyaarinta dunta iyo suufka
Miiqidda iyo duubidda dunta
Falkinta,isku gaynta iyo diyaarinta kaarka naqshadaha.
Falkinta:
Tolidda;
Sibaaqaynta, midabaynta iyo dhamaystirka dharka.

5.HOODHINTA, MAGDHINTA IYO KALA SOOCIDDA SAANTA IYO DHOGORTA:

1.Hoodhinta.
2.Hoodhidda dhogorta.

6.MAKIINADAHA SAMAYNTA CUNTADA IYO CABIDDA:

Shiididda badarka
Shiididda iyo sifaynta sonkorta.
Hiliblayaasha:
Kaydinta cuntada iyo cabidda
Kala miiridda caanaha,burcadka iyo farmaajada;
Samaynta burka iyo nacnaca;
Samaynta khamiirka iyo alkolka.

7.DIYAARINTA BUURIGA IYO SOO SAARIDDIISA:

1.Diyaarinta buuriga.
2.Samaynta sigaarka.

8.DAWAARLAYAASHA, DHARTOLAYAASHA MAKIINADDA YAQAAN.

Dawaarlayaasha iyo dhartolayaasha;
Dawaarlayaasha dharka suufka ah
Tolidda koofiyada ragga iyo haweenka;
Googoynta, nashqadaynta dharka.
Tolma yaqaan iyo daabac sameeye.
Tolidda dharka adag

9.KABOTOLAYAASHA IYO SAAMAHA;

Kabotolayaasha iyo kabo hagaajiyayaasha:

10.SAMAYNTA ALAABTA GURYAHA IYO FARSAMADA QORIGA;
1.Samaynta alaabta guryaha (loox)
2.Ku shaqaynta makiinadda qoriga.

11.GOOGOOYNTA DHAGAXA IYO XARDHINTA;
.Googooynta dhagaxa iyo xardhinta.

12.BIRTUMIDDA,QALABSAMAYNTA IYO KU SHAQAYNTA MAKI-INADDA QALABKA:
Birtumidda,dubaynta iyo moofaynta birta.
Qalabsamaynta, naqshad samaynta birta iyo birsamaynta.
Ku shaqaynta makiinadda qalabka samaysa ee is wada;
Ku shaqaynta makiinadda qalabka samaysa.

8-Xoqidda,yaraynta iyo afaynta qalabka wax gooya.

13.SAMAYNTA QALABKA CABIRKA,ISKUGEYNTA XUBNAHA MAKIINADAHA IYO MAKIINAD SMAYNTA;
Makiinad smaynta,isugaynta iyo toornada;
amaynta saacadaha (waaweyn.yaryar)iyo qalabka cabbirka;
amaynta baabuurta;
amaynta makiinadaha dayuuradaha.

14-SAMAYNTA MAKIINADAHA KORONTADA IYO ELEKTA-ROONIKADA;
amaynta korontada
amaynta elektaroonikada;
sugaynta xubnaha korontada iyo elektaroonikada;
lagaajinta raadiyaha iyo raadiyaha layska arko(telefishanka)
ialiyayaasha talefoonada iyo telagaraafyada;
)higidda xarkaha korontada iyo isku xirka.

5-IDAACADAHA IYO QALABKA CODKA DHEEHAYA;
.Farsamo yaqaanka idaacadda.
.Farsamo yaqaanka qalabka dhawaaqa iyo filim wadayaasha;

6.TUUBISTE,ALXANLE,SAFEEXAD YAQAAN BIRDHISMO;
'uubiste iyo duun yaqaan
.lxanle iyo ololkujire;
afeexad yaqaan.
irdhismo diyaariye iyo dhise.

7.DAHABLE IYO CADAB KA SHAQEEYE;
.Dahable,qalab iyo macdan tume.

8-QURAARAD SAMAYNTA.
uraarada sameeye gooye,xaquuqe, iyo dhamaystire.
amaynta dhoobada iyo qalabka xaquuqa.
Ioofaynta quraaradda iyo jeermikada.

Xardhidda quraaradda
Rijiyeynta iyo naqshadaynta quraaradaha.
19.SAMAYNTA CINJIRKA IYO CAAGGA;
1.Samaynta cinjirka iyo caagga
2.Samaynta lugaha cinjirka iyo caagga.

20-SAMAYNTA WARQADAHA IYO KARTOONADA;
Samaynta sanduuqa waraaqaha iyo kartoonada.
21-DAABACAADDA;
Diyaarinta xuruufta daabacaadda(gacanta iyo makiinadda)
Ku shaqaynta makiinadaha daabaca xaashiyaha safeexadaha iyo kuwa la xiriira.
Samaynta safeexadaha daabaca ah(STERECTYBERS AND ELECTYFERS)
Xardhaynta sawirka
Xardhaynta qalabka daabaca

22.1.RIJIYE(RIJIYEYN)
1.Rijiye dhisme.

23-WAX SOO SAARKA;
1.Samaynta iyo hagaajinta qalabka muusikada
2.Tolidda kolayada iyo xaaqimada
3.Samaynta shubka, waxyaalaha kala geddisan.

24.FUUNDIGA,INJINEERKA IYO DHISMAHA.
Leben dhigaha, dhagaxa dhisaha iyo marmar dhigaha.
Diyaarinta shubka,dhamaystirka shamiitada.
Saaqaf sameeye(foorers).
Najaarnimo iyo qoryo isku hagaajiye.
Gidaar salaaxe
Galinta gidaarka qalabka,dhuumaha iyo qaboojiyaha.
Quraaradaynta albaabada iyo daaqadaha.
Dhismaha.

25-MAKIINADAHA ABUURIDA KORONTADA,BIYO KARIYAHA IYOTALAAJADAHA.

1.Makiinadaha qaybinta xoogga korontada,neefta iyo biyaha.
2.Makiinadaha ceelasha biyaha.

26-MAKIINADAHA SOO SAARIDDA SHIXMADDA.
1.Ku shaqaynta makiinadaha rogidda iyo raridda.
2.Hagaajinta kaybalada iyo ku shaqaynta makiinadaha wax jiida.
3.Makiinadaha carro guridda.
4.Ku shaqaynta wiishashka iyo wareenada.

27-GAADIIDKA;
1.Hagaajinta makiinadaha maraakiibta.
2.Hagaajinta wadiida tareenada

3.Wadida baabuurta.
4.Hagaajinta makiinadaha baabuurta.

28-HAWL.
Cunto kariye.
Safaynta dharka iyo kaawiyadaynta.
Timo hagaajiye iyo xiire.
Dab damiye.

29.SAMAYNTA JALDIYADA BUUGAGA, WARGEYSYADA,IYO DAABICIDDA XURUUFTA WAAWEYN;
30.DAABACA MAIDABYADA,FILIMADA IYO SAWIRKA.

QODOBKA 1AAD.

Marka laga bilaabo taariikhda Madaxweynaha Dawlad Goboleedka ıntland uu saxeexo, waxaa dib loo habeeyey dhismaha Guddiyada goobaha ıaqada dawlad goboleedka puntland.

QODOBKA 2AAD.
Guddiyada goobaha shaqada ee shaqaalaha dawlad goboleedka ıntland,waxay xaruntiisa noqonaysaa magaalo madaxda D.G.PL."Garoowe". 'axayna guddiyadaasi hoos imaanayaan agaasinka guud ee shaqada iyo aqaalaha,waxayna ka furan karaan laamo goboladda iyo degmooyinka, tuuoyinka iyo xuramaha shaqada oo dhan ee D.G.PL.

QODOBKA 3AAD.

Guddiyada goobaha shaqada iyo shaqaalaha D.G.PL, iyagoo fulinya baramijka D.G.PL. ee soomaaliya ayey hawlahooda ugu waaweyn oo loo xil aray noqonayaan kuwa soo socda;

.Difaaca dalka D.G.PL.iyo ilaalinta guulihii D.G.PL, soo hoysay 1dii ogos-1998. Iyadoo tixgelinysa dhibaatooyinka dalka yiilayD.G.PL. ka hor gaar aan kuwii haystay shaqaalaha iyo dadweynaha iyo sidii ay uga hawl shay.D.G.PL,xallintooda.
..Guddiyada goobaha shaqada waxaa loo dhisay xilkooduna yahay, kordhintacab soo saarka, xannaanaynta iyo ilaalinta hantida ımadda,daryeelida,badbaadinta iyo harumarinta danaha dadweynaha iyo aqaalaha D.G.PL.Soomaaliya.

QODOBKA 4AAD.
J hoggaansanka,adkaynta iyo ilaalinta shuruucda dalka iyo go'aamada G.PL, iyo kor u qaadida garaadka siyaasiga aqoonta farsamada iyo xirfadda aqaalaha.